# XORRIYA

Waa Wargeys Madax banaan oo todobaadkii 2 Cisho soo baxa, Isniin iyo Khamiis  Hargeysa Somaliland


| | |
|---|---|
| Hargeysa | 1500 Sl.Sh. |
| Berbera | 1500 Sl.Sh. |
| Boorama | 1500 Sl.Sh |
| Gabiley | 1500 Sl.Sh. |
| H/Sheekh | 3 Bir |
| Djibouti | 100 FDJ |

Issue No: 1725

Isniinta 8 September 1997

# Midawga Yurub oo doodahoodii Fidiraal iyo Konfidiraalka ka furay Somaliland

## "Fikrad shandad lagu soo qaaday oon la jaan-qaadi karin xaqaa'iqa kama hir gali karto dalka"



Brof. Brendan oo jeedinaya cashar

XOR(Hargeysa)-- Xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Jamhuuriyadda Somalialnd hoolkeeda shirarka, ayaa shalay subax lagu qabtay siminaar ay soo qaban qaabiyeen ururka midowga Yurub qaybta Soomaaliya oo ku saabsanaa qaab-dhismeedka siyaasadda maamul ee kala fidsan, ama aan mel kaliya laga xukumin (Decentralised political structure). Seminaarkan shalay subax laga furay magaalo madaxda Jamhuuriyadda Somalialnd ee Hargeysa, kana soo qayb galeen dhammaan maamulada gobolada, degmooyinka qaarkood, xubno golayaasha [illegible] iyo

Eeg Bogga 2aad

# Kambaniga Collins oo maalgelinaya korontada dalka

Eeg Bogga 9aad

# Xoolo ku sumoobay jiidda Galbeed

XOR(Gabilay)--Sun lagula dagaalamo cayayaanka Beeraha waxyeelleeya ayaa ku dhishay xoolo tiradoodu gaadhayso dhawr iyo toban neef oo Lo' ah Arabsiyo iyo Huluuq oo ka tirsan beesha Arabsiyo. Waxa kale oo ku dhawaday dhimasho nin oday ah oo ka mida xoola dhaqatada ku isticmaashay suntaasi xoolaha, sidaa waxa u sheegay weriyahayga Gabilay dhawaan Maxmaed Ibraahim Nadiif guddoomiyaha Arabsiyo iyo ku xigeenkisia Mr. Batuun.

Si haddaba aan wax uga ogaano arrinta sutnan, oo la shegay inay beerlayada u qaybisay Wasaaradda beeraha xafiiskeeda Gabilay, ayaan la xidhiidhnay isuduwaha Wasaaradda Beeraha ee degmada Gabilay C/risaaq Sh. Muxumed Gaboobe, waxaanu sheegay isuduwhu inaan sutna loogu talo gelin xoolaha, balse loogu talo galay beeraha in

Eeg Bogga 9aad

